

Amarka L. 17 rep.

Calanka Soomaaliyeed.

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAMULAHA

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Talyaaniga 9 Disember 1952, lamba. 2357;

Marka uu tixgaliyay in shacabka soomaaliyeed ay si niyo sami leh u weydiisteen in ay yeeshaan calan u gaara ee qaran;

Marka uu tixgaliyay in Golaha Dalka, fadhigooda 1 Julaay 1954, ay cod wadajira iyago ka wakiila shacabka soomaaliyeed oo idil, ay ku soo taliyeen in loo sameeyo calan ka kooban maro affar gees leh oo leh midibka buluugga, dhexdana ay ku taal xiddig shan gees leh oo cad;

Isagoo ka tilmaan qaadanaya xitaa magaca Dawladda Jamhuuriyada, Talyaaniga, kana tarjumaya dareenka iyo rabitaanka shacabka soomaaliyeed oo idil;

Marka uu arkay heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 4 ee dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga 9

Disember 1952, lamba. 2357.

WUXUU AMAR KU SOO SARAYAA

Qod. 1

Calanka Soomaaliyeed ee lagu soo sheegay gogoldhiga amarkaan waxaa laga taagayaa, Xaafiisyada, Talisyada iyo Adeegyada Maamul si waafaqsan xeerarka, Dalka, iyado laga barbar taagayo Calanka Talyaniga.

Qod. 2

Maamulka waxaa loo wakiishay in uu dekereeto ku soo saaro, xeerar lagu dhaqayo Calanka Soomaaliya.

Muqdisho, 6 Setember 1954.

Maamulaha